



Macluumaadka tallaalka

U akhri macluumaadka hoose si taxadar leh kahor intaadan saxiixin foomka ka raali ahaanshaha. Si aad ogaato wax intaas ka sii badan booqo healthywa.wa.gov.au/immunisation

	Papillomavirus Bani'aadamka (HPV)	Gowracatada, teetanada iyo xiiq dheerta (dTpa)
Waa maxay cudurku?	Papillomavirus Bani'aadamka (HPV) waa fayras guud oo saameeyaa labadaba dumarka iyo ragga. HPV waa mid si aad ah laysu qaadsiyo iyo ilaa 90% ee dadka galmo ahaan firfircoon waxaa saameyn doona HPV ilaa wakhti noloshooda. Jirku dabiici ahaan ayuu infekshinka isaga baabiiyaa iyo noocyada ugu badan ee HPV, malaha wax astaamo ah. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah noocyada HPV ayaa keeni kara burooyinka ferjiga qaar ka mid ah fayraskuna wuxuu isku adkeynayaa jirka sannado fara badana , wuxuu keenayaa kansarka ilmo galeenka, goobaha ferjiga (ferjiga dumarka, dhuunta, ferjiga ragga) dabada, afka iyo cunaha.	Gowracatada waa lays qaadsiyaa waxayna leedahay infekshinka bakteeriyada leh ee naf ka goyska ah oo sababa Dhibaatooyinka neefsiga ee daran, wadno istaag iyo waxyeelada neerfaha. Teetanada waa wax daran, oo badanaa leh cudur bakteeriyada leh oo dhimasho keena oo saameeyaa nidaamka neerfaha. Dadka qaba teetanada waxay ku dhibtoodaan qabashada muruqyada oo xannuun badan darana, suuxdinta iyo daamanka oo isqabsada. Suuxitaankan waxaa laga yaabaa inuu saameeyo jirkoo dhan, isagoo sababaya neefta oo ku xiranta iyo wadnaha oo istaaga. Xitaa iyadoo la adeegsanayo daryeelka degdega casriga ah inta ugu badan waa hal 50 qof ee teetanadu ku dhacdo ayaa dhimanaya. Pertussis , ama xiiq dheerta, waa cudurka neefsiga oo infekshinkoodu aad u sareeyo oo noqon kara mid nafta ka qaadi kara ilmaha dhashay. Qiyaastii hal 125kiiba Ilmaha ka yar da'da lixda bilood ee qaada pertussis wuxuu u dhiman doonaa kolba aaryo ama dhaawac maskaxeed.. Dhalinyarada iyo dadka waa weyn ee qaba pertussis waxaa qaban doona astaamo sida kuwa hargabka oo kale ah waxayna yeelan karaan qufac daran ilaa saddex bilood.
Sidee buu cudurku ku u faafaa?	HPV waxay ku faaftaa maqaarka ferjiga ee gaara maqaarka ferjiga ee kale intuu socdo nashaadka galmada ee qof qaba fayraska. Fayraska HPV waa wax aad u yar oo mari kara jeexdinta yare e maqaarka. Laguma faafiyo dhiiga. Kondomisku waxay kaa siinayaan ilaalin xaddidan HPV, sababtoo ah ma daboolayaan dhammaan maqaarka ferjiga.	Bakteeriyada gowracatada waxay ku noolaan kartaa afka, sanko, cunaha ama maqaarka qofka qaba. Dadku waxay qaadi karaan gowracatada iyagoo neefsi ku qaada bakteeriyada ka dib marka qof qabaa uu hindhiso ama qufaco. Dadku waxay sidoo kale ku qaadi karaan gowracatada si dhow isu taabashada wax aka soo baxa qofka qaba afkiisa, sankiisa, cunihiisa ama maqaarkiisa. Teetanada waxaa sababa bakteeriyada laga helo carada iyo saalada xayawaanka. Bakteeriyadu waxay geli karaa jirka dhaawaca u yar sida meel biin kaa muday. Qofna qofka kale uma gudbin karo. Pertussis , ama xiiq dheerta si sahal ah ayaa loo faafiyaa marka qofka qaba uu ku qufaco ama hindhiso bakteeriyada hawada oo ay ka dib jidi karaan kuwa kale ee u dhow. Haddii aan la daaweyn, qofka qaba xiiq dheerta wuxuu qaadsiin kara kuwa kale ilaa iyo saddex toddobaad ka dib bilowga astaamaha.

	Papillomavirus Bani'aadanka (HPV)	Gowracatada-Teetanada-Xiiq dheerta (dTPa)
<p>Tallaalku ma ammaan baa wax ku ool ah?</p>	<p>Haa, in ka badan 270 milyan oo ah dooska tallaalka HPV ayaa la siiyey aduun weynaha tobankii sanno la soo dhaafay, wuxuu ku taliyey Ururka Caafimaadka Aduunka, waana ammaan si wanaagsana waa loogu adkeystaa. Tallaalka HPV immunization wuxuu sida ugu wanaagsan ugu shaqeeyaa marka lagu siiyo qofkoo da'a yar jira sababtoo ah jawaabta difaaca jirku way ugu xoog badan tahay waana ta ugu wax ku oolsan markaad qaadato intaysan bilaaban nashaadka galmadu. Tallaalka HPV boqolkiiba 85 -100 waa wax ku ool ka hortaga noocyada ugu waa weyn ee infekshinka keena kansarka iyo burooyinka ferjiga. Dhammaan dumarka qaatay tallaalka HPV waxay weli u sii baahan doonaan ka iskiriingareynta joogtada ah kansarka ilmo galeenka sababtoo ah ah ma daboolo nooc kasta oo ah HPV.</p> <p>Malaayiin doos oo ah tallaalkan ayaa aduunka oo dhan la siiyey; waana ammaan si wanaagsanbaana loogu adkeystay.</p> <p>Kani waa tallaalka isku xiga oo 2 doose ah. Waa muhiim in dhalinyaradaadu helaan labada dooseba si loo hubiyo inay difaac buuxa helaan</p>	<p>Tallaalka dTPa aad buu u yahay mid wax ku ool ah ka hortaga gowracatada iyo teetanada qiyaastii boqolkiiba 80 waa u wax ku ool ka hortaga xiiq dheerta.</p> <p>Tallaalkan xoojiyaha ah wuxuu leeyahay cufnaan hoose gaar ahaan qaybaha gowracatada iyo xiiq dheerta marka la barbar dhigo tallaalka la bixiyo carruurnimada hore. Tallaalka xoojiyaha ahi waa ammaan si wanaagsana waa loogu adkeystaa.</p>
<p>Waa maxay waxyeelada suurtagalka ah iyo maxaan sameyn karnaa haddii ay dhacaan?</p>	<p>Waxyeelada guud</p> <p>Xannuun/casaan/cuncun/ buro yar oo ku taal gacanta meeshii tallaalka lagaa siiyey. Si ay kaaga debecdo, saar marro qoyan oo qabow meesha wax qabta</p> <p>Waxyeelada badneyn</p> <p>Xumad heerkeedu hooseeyo, dareemida inaad fiicneyn, yalaalugo, madax xannuun.</p> <p>Wixii xannuun jebin ah, dadka wax qaba waxay qaadan karaan Paracetamol si lagu tilmaamay warqada ku dhegan cabna dareere dheeraad ah. Haddii ay xumadu sii jirto, arag GP -gaaga.</p> <p>Waxyeelada aadka dhifka u ah</p> <p>Falcelin khatar ah ayaa suurtagal ah, laakiinse waa dhif. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah weji barar ama neefsiga oo kugu adkaaga. Sida daawo kasta, waxaa jira fursad aad u fog oo ah inuu tallaalku sababi karo dhaawac khatar ah ama dhimasho.</p> <p>Haddii falcelinadu tahay mid daran ama adkeysii leh, doono daaweyn dhakhso ah oo la xiriir isbitaalka xaafadaada.</p>	<p>Waxyeelada guud</p> <p>Heerka yar ee (ka hoose 38°C)</p> <p>Wixii ka debcin ah, u qaado Paracetamol sida ku tilmaaman warqada ku dhegan cabna dareere dheeraad ah. Haddii ay xumadu sii jirto arag GP -gaaga.</p> <p>Xannuun/casaan/cuncun/ buro yar oo ku taal gacanta meeshii cirbada lagaa siiyey. Si ay kaaga debecdo, saar marro qoyan oo qabow meesha wax qabta.</p> <p>Waxyeelada aadka dhifka u ah</p> <p>Brachial neuritis (hurida neerfaha gacanta, oo sababaya daciifid ama kabuubyo).</p> <p>Falcelin khatar ah ayaa suurtagal ah, laakiinse waa dhif. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah weji barar ama neefsiga oo kugu adkaaga. Sida daawo kasta, waxaa jira fursad aad u fog oo ah inuu tallaalku sababi karo dhaawac khatar ah ama dhimasho.</p> <p>Haddii falcelinadu tahay mid daran ama adkeysii leh, doono daaweyn dhakhso ah oo la xiriir isbitaalka xaafadaada.</p>

Waxaa soo saaray Agaasinka Kontoroolka Cudurka Lays qaadsiiyo
 © Wasaaradda Caafimaadka 2019

Xuquuqda qalabkan waxa lagu aaminey Dawlad Goboleedka Galbeedka Australia ilaa si kale la tilmaamo meeyee. Ka sokow macaamilka cadaalada ah oo ujeedadiisu tahay waxbarasho gaar ah, cilmi baaris ,wax ka sheegid ama dib u eegis, siduu ogol yahay ee waafaqsan *Xeerka Xuquuqda 1968* wuxuu bixinayo, qaybna dib looma daabici karo ama looma isticmaalayo ujeeda kasta oo jirta si kastaba ha ahaatee iyadoo laga heysan ogolaansho qoraal ah Gobolka Galbeedka Australia.